

Wac 614-233-2381
si aad u qabsatid
gaadiidka caafimaadka
PRS.

**Qeybta Gaadiidka
Waaxda Shaqada iyo
Adeegyada Qoyska ee
Dagmada Franklin
(Department of Job
and Family Services
Transportation Unit)
waxay furan tahay laga
bilaabo 7 a.m. ilaa
5 p.m. Isniin ilaa Jimco
(marka laga reebo
fasaxyada Dagmada)**

DIGNIIN MACAAMIISHA PRS!

Saddaxda bil ugu dambeyso xamilonimadaada, waxaad codsan kartaa in laguugu meeleeyo xaaladda WICIDDA. Tani waxay kuu ogolaan doontaa in aad si toos ah u wacdid shirkadda taksiga saacadahena shaqada caadiga ama dhamaadka todobaadka si aad u qorsheysatid gaadiid degdeg ah aad ku tagtid caafimaadka haddii loo baahdo.

Waxaad qorsheysan kartaa gaadiidkaan aad ku tagtid bixiyaha caafimaadka ama isbitaalka aad u tilmaantay Wakiilkaada Gaadiidka.

Xaggaa dhamaan ballamada caafimaadka, fadlan wac telefoonka 614-233-2381, ugu yaraan 24 saac ka hor inta aan la qaarin ballankaada.

Waxaad xaq u leedahay adeegyada gaadiidka PRS ilaa cunugaada ka gaaro 2 bil.

Waqtigaas kaddib, waa in aad sameysid qorshooyin kale ama waa in aad isku qortid adeegyada gaadiidka caafimaadka hoos yimaada barnaamijka xaq u yeelashada adiga oo waca Maalmulaha Kiiskaada.

Franklin County Department of Job and Family Services
1721 Northland Park Avenue, Columbus, OH 43229



FCDJFS #126 (Rev. 8-2016)

SU'AALAHHA IYO JAWAABAHHA

Adeegyada la Xariira Xaamilonimada

Adeegyada Gaadiidka Taksiga Caafimaadka



Q SIDEE AYAAN U HELAA TAKSI KU SOCOTA TAKHTARKA?

A WAC QEYBTA GAADIIDKA, TEL. 614-233-2381

si aad u ballansatid gaadiidka ama u xaqiijisid qorshaha taksiga. Codsiyada waa in la soo gudbiyo 24 saac ama hal maalin oo la shaqeeyo ka hor inta aan la gaarin ballankaada takhtarka.



Q SIDEE AAYAAN KU TAGAA GURIGA MARKA AAN KA IMAADO TAKHTARKA?

A Wadaha taksiga wuxuu ku siin doonaa warqad la isticmaalo marka aad diyaar u tahay in aad ku soo noqotid guriga ama tagtid ballankaada caafimaadka xiga.

Wac nambarka ku qoran warqadda la soo celiyo si aad u wacatid taksi marka aad diyaar u tahay in aad ka tagtid meesha aad iminka ku sugan tahay.

Q GOORMAA LOO BAAHAN YAHAY IN AAN DIYAAR AHAADO?

A Waa in aad diyaar u ahaatid taksiga hal saac ka hor inta aan la gaarin waqtiga ballankaada.
(Taksiga wuxuu imaan karaa waqti kasta inta lagu dhex jiro saacadda ka horeyso waqtiga ballankaaga).

Q MAXAA DHACA HADDII TAKSIGA IMAAN WAAYO?

A Xaaladaha cimilada iyo qodobada kale waxay amayn karaan marka takhsiga kuu yimaado. **Haddii taksiga uusan ku imaanin 30 daqiiqo ka hor inta aan la gaarin ballankaada, wac Qeybta Gaadiidka, telefoonka 614-233- 2381, si aan u xaqiijino in lagu soo diro taksi. TOOS HA WICIN SHIRKADDA TAKSIGA!**

Waxaan qabnaa habab khaas ah xaqiiji gaadiidkaada.

Q MAXAA DHACA HADDII AAN U BAAHDO TAKSIGA SAACADAHA SHAQADA DAGMADA KADDIB AMA DHAMAADKA TODOBAADKA?

A Haddii aad u baahan tahay taksi saacadaha Dagmada kaddib, horay ula xariir Qeybta Gaadiidka saacadaha shaqada Dagmada kaddib.

Q MAXAA DHACA HADII LOO BAAHAN YAHAY IN AAN JOOJI AMA BADDAL QORSHAHEYGA TAKSIGA?

A Haddii ay qasab kugu noqoto in aad joojisid ama baddashid macluumaad kasta oo ku saabsan gaadiidka taksiga lagu ballamiyay, sida waqtiga, taariikhda, ama goobta, waa in aad wacdid una sheegtid isbaddaladaan Qeybta Gaadiidka, FCDJFS. Bixiyaha gaadiidka taksiga waxaa loo ogol yahay in ku geeyo meesha aan farno keliya.

Wac LEAP Maamulaha Kiiskaada

si uu u baddalo
jadwalkaada gaadiidka
LEAP.

Wac 614-233-2381

Qeybta Gaadiidka
Waaxda Shaqada iyo
Adeegyada Qoyska
ee Dagmada Franklin
(Department of Job
and Family Services
Transportation Unit)
waxay furan tahay
laga bilaabo 7 a.m. ilaa
5 p.m. Isniin ilaa Jimco
(marka laga reebo
fasaxyada Dagmada)

MACLUUMAADKA KHAASKA AH ARDAYDA LEAP!

Haddii aad gaftid taksi la ballamiyay in ka badan labo maalin isku xigta, waxaa dhici karto in gaadiidkaada la joojiyo ilaa arrinta laga xalliyo. Shirkadda taksiga waajib kuma aha in ay ku sugto haddii aadan diyaar ahayn waqtiga lagu soo qaado.

**Waa in aad diyaar
tahay waqtiga lagu
ballamiyay in lagu
soo qaado!**

Waxaad si toos ah u wici kartaa taksiga shirkadda haddii aad u baahan tahay in aad joojisid taksigaada **ka hor** inta aan la gaarin saacadaha shaqada wakaaladda **keliya**.

Franklin County Department of Job and Family Services
1721 Northland Park Avenue, Columbus, OH 43229



FCDJFS #121 (Rev. 8-2016)

SU'AALAH IYO JAWAABAHA

**Barashada
Xoogsiga iyo
Waalidnimada
(LEAP)**

Adeegyada Gaadiidka
Taksiga Caafimaadka



Q **SIDEE AYAAN
U QORSHEYSTAA
LEAP?**

A **Maamulaha
Kiiskaada LEAP**
waa in uu jadwalkaada u
diro **Qeybta Gaadiidka**. Tani
waxaa ka mid ah cinwaanada,
maalmaha iyo waqtiyada adiga
lagu soo qaadi doono.

Q **GOORMAA LOO
BAAHAN YAHAY
IN AAN
DIYAAR AHAADO?**

A **Waa in aad diyaar u ahaatid
taksiga hal saac ka hor inta
aan la gaarin waqtiga
ballankaada.**
(Taksiga wuxuu imaan karaa waqti
kasta inta lagu dhex jiro
saacadda ka horeyso waqtiga
ballankaaga).

Q **MAXAA DHACA HADII
LOO BAAHAN YAHAY
IN AAN JOOJIYO
TAKSIGEYGA?**

A **Wac Gaadiidka
Qeybta, telefoonka
614-233-2381 saacadaha
shaqada wakaalada si aad u
joojisid gaadiidkaada.** Waxaad toos
u wici kartaa shirkadda taksiga
saacadaha shaqada wakaaladda ka
hor.

Q **MAXAA DHACA
HADDII TAKSIGA
IMAAAN WAAYO?**

A **Xaaladaha cimilada iyo
xaaladaha kale waxay saamayn
karaan waqtiga marka aad u
baahan tahay taksigaada
imaan doono. Haddii taksiga
uusan ku imaanin muddo 30
daqiiqo kaddib waqtiga la
ballamiyay, wac Qeybta
Gaadiidka, telefoonka 614-
233- 2381. Waxaad si toos ah
u wici kartaa shirkadda taksiga
ka hor inta aan la gaarin
saacadaha wakaaladda
shaqeyso.**

Q **SIDEE AYAAN U
WACAA AAN KU
TAGO GURIGA?**

A **Wadaha taksiga wuxuu ku
siin doonaa warqad la
adeegsado marka aad diyaar u
tahay in aad ku soo noqotid
guriga kana timaadid dugsiga.**

**Wac nambarka ku yaal
warqadda la soo celiyo si aad u
wacatid taksi marka aad diyaar
u tahay in aad ka tagtid dugsiga
haddii waqtiga lagu soo qaado
aan horay loo qorsheynin.**

Q **MAXAA DHACA
HADDII
JADWALKAAEYGA
ISBADDALO?**

A **Haddii ay qasab kugu
noqoto in aad baddashid
macluumaadka ku saabsan
gaadiidka taksiga kuu
ballansan, sida waqtiga, taariikhda,
ama goobta, waxaad isbaddalada u
soo sheegtaa Maamulahaada
Kiiska LEAP. Bixiyaha gaadiidka
taksiga waxaa loo ogol yahay in uu
ku geeyo meesha aan u tilmaano.
Looma ogola in ay baddalaan
macluumaadka aan siino ee ku
saabsan safarkaada taksiga.**

Wac 614-233-2381
si aad u codsatid tigidhada
ballamada caafimaadka.

**Qeybta Gaadiidka
Waaxda Shaqada iyo
Adeegyada Qoyska
ee Dagmada Franklin
(Department of Job
and Family Services
Transportation Unit)
waxay furan tahay
laga bilaabo 7 a.m.
ilaa**

**5 p.m. Isniin ilaa Jimco
(marka laga reebo
fasaxyada Dagmada)**

Franklin County Department of Job and Family Services
1721 Northland Park Avenue, Columbus, OH 43229



FCDJFS #123 (Rev. 8-2016)

SU'AALAH **IYO** **JAWAABAHA**

**TIGIDHADA
BASKA**

Adeegyada
Gaadiidka
Caafimaadka




Waaxda Shaqada iyo Adeegyada
Qoyska ee Dagmada Franklin

Q SIDEE AAYAAN U
HELAA
TIGIDHADA BASKA
BALLAMADA
CAAFIMAADKA?

A WAC QEYBTA GAADIIDKA
614-233-2381

si aad u codsatid in lagu soo diro
tirada tigidhada baska aad u baahan
tahay. Codsiyada waa in la soo
gudbiyo 10 maalin la shaqeeyo ka hor
inta aan la gaarin ballamadaada
caafimaadka.



Q INTEE
TIGIDH AYAAN U
BAAHANAHAY?

A Mid kasta oo ka mid ah
tigidhka baska waxaa la baska
COTA lagu raaci karaa hal
maalin buuxdo. Xattaa haddii
aan la fiirin ballamada aad
leedahay muddo hal maalin,
waxaad isticmaali kartaa hal
tigidh si aad u raacdid baska
maalinta oo idil.

Q MAXAA DHACA
HADDII
TIGIDHADEYDA
AYSAN IMAANIN?


A Haddii tigidhadaada aysan
imaanin shan maalin ka hor
ballankaada, **wac Qeybta
Gaadiidka, telefoonka 614-233-
2381** kaddibna ogeysii in tigidhadii aad
codsatay aysan weli imaanin. Waxaan
xaqijin doonaa cinwaankaada iminka iyo
waxaan iskudayi doonaa in aan dib
kuugu soo dirno tigidhada aad codsatay.

Dhakhso aan u ogaano haddii
isbaddalka cinwaanka dirista!

Q CARUURTEYDA
MA U BAAHAN
TAHAY
TIGIDHADA
BASKA?

A Caruurta ka yar 7 sanno
waxay raacaan
COTA lacag la'aan. Caruurta
7-12 waxay xaq u leeyahiin
Tigidhada Dhallinta ee la dhimay.

Aan ogaano haddii qaar ka mid ah
rakaabka waxay ku jiraan



Wac 614-233-2381
si loo qorsheeyo Qeybta XX
gaadiidka.

**Qeybta Gaadiidka
Waaxda Shaqada iyo
Adeegyada Qoyska
ee Dagmada Franklin
(Department of Job
and Family Services
Transportation Unit)
waxay furan tahay
laga bilaabo 7 a.m.
ilaa 5 p.m. Isniin ilaa
Jimco (marka laga
reebo fasaxyada
Dagmada)**

DIGNIIN QEYBTA XX MACAAMIISHA!

Macaamiisha qaadata Qeybta XX
adeegyada gaadiidka waxaa caadi
ahaan lagu soo koobaa afar safar
horay iyo gadaal muddada 6da-bil
ay xaqa u leeyahiin, haddii aan
lagu dabaqi karin xaalado khaas
ah.

La xariir Qeybta Gaadiidka
si aad u heshid macluumaad
ku saabsan soo koobida
adeegyada gaadiidka.

Franklin County Department of Job and Family Services
1721 Northland Park Avenue, Columbus, OH 43229



FCDJFS #117 (Rev. 8-2016)

SU'AALAHHA IYO JAWAABAHHA

Qeybta XX
Adeegyada
Gaadiidka Taksiga
Caafimaadka



Q SIDEE AYAAN U HELAA TAKSI AAN KU TAGO TAKHTARKA?

WAC

QEYBTA GAADIIDKA, TEL.
614-233-2381

si aad qabsatid gaadiid ama u xaqiijisid qorshahaada taksiga. Codsiyada waa in la soo gudbiyo 24 saac ama hal maalin oo la shaqeeyo ka hor inta aan la gaarin ballankaada takhtarka.



Q SIDEE AYAAN KU TAGAA GURIGA MARKA AAN KA SOO NOQDO TAKHTARKA?

Wadaha taksiga wuxuu ku siin doonaa warqad la adeegsado marka aad diyaar u tahay in aad ku soo noqotid guriga ama tagtid ballankaada caafimaadka xiga.

Wac nambarka ku qoran warqadda laguu soo celiyo

si aad u wacatid taksi marka aad diyaar u tahay in aad ka tagtid goobta aad iminka ku sugan tahay.

Q GOORMAA LOO BAAHAN YAHAY IN AAN DIYAAR AHAADO?

A Waa in aad diyaar u ahaatid taksiga saacadda ka horeyso waqtiga ballankaada.

(Taksiga wuxuu imaan karaa waqti kasta inta lagu dhex jiro saacadda ka horeyso waqtiga



Q MAXAA DHACA HADDII TAKSIGA IMAAN WAAYO?

A Xaaladaha cimilada iyo qodobada kale waxay saamayn karaan marka takhsigaada yimaado. **Haddii taksiga uusan imaanin 30 daqiiqo ka hor inta aan la gaarin ballankaada, wac Qeybta Gaadiidka, telefoonka 614-233-2381, si aan u xaqiijino in laguu soo diro taksi.**

TOOS HA U WICIN SHIRKADDA TAKSIGA!

Waxaan qabnaa habab gaar ah aan ku xaqiijino gaadiidkaada.

Q MAXAA DHACA HADDII AAN U BAAHDO TAKSI SAACADAHA SHAQADA DAGMADA KADDIB AMA DHAMAADKA TODOBAADKA?

Haddii aad u baahan tahay adeegga taksiga saacadaha dagmada shaqeyso **kaddib**, horay ula xariir Qeybta Gaadiidka.



Q MAXAA DHACA HADDII AAN U BAAHANAHAY AMA BADDALO QORSHAHEYGA TAKSIGA?

Haddii ay qasab kugu noqoto ama in aad samaysid isbaddal ku saabsan gaadiidka taksiga la ballamiyay, sida waqtiga, taariikhda, ama goobta, waa in aad la xariirtid Qeybta Gaadiidka ee FCDJFS.

Bixiyaha gaadiidka taksiga waxaa loo ogol yahay in uu ku geeyo meesha aan farno keliya.

Wac 614-233-2381

si aad u qorsheysatid
gaadiidka NET.

Qeybta Gaadiidka
Waaxda Shaqada iyo
Adeegyada Qoyska
ee Dagmada Franklin
(Department of Job
and Family Services
Transportation Unit)
waxay furan tahay
laga bilaabo 7 a.m.
ilaa 5 p.m. Isniin ilaa
Jimco (marka laga
reebo fasaxyada
Dagmada)

Franklin County Department of Job and Family Services
1721 Northland Park Avenue, Columbus, OH 43229



FCDJFS #122 (Rev. 8-2016)

SU'AALAH **IYO** **JAWAABAHA**

**Gaadiidka Aan-
Degdeg Ahayn
(NET)
Adeegyada
Gaadiidka
Taksiga
Caafimaadka**



Q SIDEE AAYAAN KU HELAA TAKSI AAN KU TAGO TAKHTARKA?

WAC QEYBTA GAADIIDKA
TEL. 614-233-2381

A si aad u qabsatid gaadiid ama u xaqiijisid qorshahaada taksiga.
Codsiyada waa in la soon gudbiyo ugu yaraan 24 saac ama hal maalin la shaqeeyo ka hor inta aan la gaarin ballanka takhtarkaada.



Q SIDEE AAYAAN KU TAGAA GURIGA MARKA AAN KA IMAADO TAKHTARKA?

A Wadaha taksiga wuxuu ku siin doonaa warqad la adeegsado marka aad diyaar u tahay in aad ku soo noqtid guriga ama tagtid ballankaada caafimaadka xiga.
Wac nambarka ku qoran warqadda lagu soo celiyo si aad u wacatid taksi marka aad diyaar u tahay in aad ka tagtid goobta aad iminka ku sugan tahay.

Q GOORMAA LOO BAAHAN YAHAY IN AAN AHAADO DIYAAR?

A Waa in aad diyaar u tahay taksiga hal saac ka hor inta aan la gaarin waqtiga ballankaada.

(Taksiga wuxuu imaan karaa waqti kasta inta lagu dhex jiro saacadda ka horeyso waqtiga ballankaaga).



Q MAXAA DHACA HADDII TAKSIGA IMAAN WAAYO?

A Xaaladaha cimilada iyo qodobada kale waxay saamayn karaan marka takhsigaada yimaado. **Haddii taksiga ku imaan waayo muddo 30 daqiiqo ka hor inta aan la gaarin ballankaada, wac Qeybta Gaadiidka, telefoonka 614-233-2381, si aan u xaqiijino in lagu soo diro taksi.**

TOOS HA WICIN SHIRKADDA TAKSIGA!

Waxaan qabnaa habab khaas ah xaqiiji gaadiidkaada.

Q MAXAA DHACA HADDII AAN U AAHDO TAKSI SAACADAHA SHAQADA DAGMADA KADDIB AMA DHAMAADKA TODOBAADKA

A Horay ula xariir Qeybta Gaadiidka haddii aad u baahatid adeegga taksiga saacadaha shaqada Dagmada **kaddib.**



Q MAXAA DHACA HADDII AAN U BAAHDO IN AAN JOOJIYO AMA BADDALO QORSHAHEYGA TAKSIGA?

A Haddii ay qasab kugu noqoto in aad joojisid ama baddashid qorshahaada gaadiidka taksiga lagu ballamiyay, sida ti me, da te, ama goobta, waa in aad la xariirtid Qeybta Gaadiidka, FCDJFS.

Bixiyaha gaadiidka taksiga waxaa loo ogol yahay in uu ku geeyo meesha aan farno.